



Xanuunka Autism Isbektiram (Autism Spectrum Disorders ama ASD) Su'aalaha Badiya ay Weydiyaan Fidiyeyaashu

Waa maxay Xanuunka Autism Isbektiram (ASD)?

Autism iyo Xanuunka Hagoogiyaha Koritaanka ama Pervasive Developmental Disorders (PDD) waa xanuun la yaab leh oo koritaanka ku lug leh oo saameysa 5 ilaa 15 marka la eego 10,000 ee carruureed, waana labada xanuun ee ka mid ah Xanuunka Autism Isbektiram (ASD). Carruurta u hayo cudurkan dareemayaasha ku saleysani waxay ka kal socdaan waddano, dhaqmmo, wax lahaansho dhaqaale oo idil dhammaantood. Waxa jirta xaqiijin adag oo sheegeysa in ay "Autism"ku jiro marka la dhasho Astaamuhuna waxay soo muujisnaan da'da u dhaxaysa hal sano ilaa saddex sano, oo xaaladaha ugu badan, waxay aafeysaa kobaca hadalka iyo dad dhex-galka, oo khaastan dhex-galaka carruurta kale. Cuduradani badiyaa, laakiin aan ahayn had iyo jeer, waxay wada jiraan dhib ka haysashada wax foajignaan iyo kala duwanaanshaa waxayaabaha la jecleysto Ereyada looma isticmaalo in lagu sharaxo dib uga hadh kobcitaan, laakiin in waxa weeye ka duwanaansho ama ka weecad ah kobicidda waxyaabaha ah xidhiidhka iyo dad dhex-galka, iyo u fiirsiga waxyaabaha. Carruurta da'doodu u dhaxeeyso hal sano ilaa saddex ayaa baiyaa laga helaa PDD sabata oo ah kala gedisnaanta kobicitaanka aadka u sareysa ee carruurta ee sku kala jirka da'dan, iyo sababta oo ah dabciyada loogu timaamo autismka oon laga fileyn ad ugu weyntahay carruurta ka yar saddex jirka.

ASD waxa wada hagoogsan PDD iyo waliba ay ku jirto autism, Rett's Disorder, Xanuunka Kala-daadashada Carruurta (Childhood Disintegrative Disorder), Asperger's Syndrome, iyo Xanuun Fidaha Kobcinta (PDD) oon badiya loogu yeedin (PDD-NOS). Xanuunkani waxa u sheegayaa kala duwanaan tayo iyo tiro ahaanba kartida ilmuhu u kula xidhiidhi karo, bulshad u ku dhex gali karo iyo u kala macaamili karo sheyda iyo waxyaabaha caadiga uu u sameeyo ilmuhu Tirooyinka dabeecadaha iyo xadka xumaanta dhexgal la'aanta meel kasta ayaa lagu qiyaasaa qaybaha gaarka ah ee baadhitaan. Marka lagula isticmaalayo kalamadha Xanuunka Autism Isbektiram Carruurta aadka u yar-yar waxa laga yaabaa iney xaqiiqda uga dhowdahay sababta oo ah xirfadaha ciyaaraha iyo la xidhiidhka qaarkood ayaan wali laga fileynnin iney kobceen wakhtiga ugu horeysa ee la qiimeynayo. In kasta oo carruurta laga beddeli magac ku sheegga baadhitaan xanuunkaas noocyada badan kolba wakhtigu marka u socdo, haddana laakin waxay u badan tahay iney ku hoos jiraan wali ASD. Waalidka iyo fidiyeyaasha waxa ugu muhiimsan iney u fiirsadaan ama ha magaca la siiyo xanuunka ilmaha, laakiin xoogga la saaro wixii la qaban lahaa sidii looga caawin lahaa ilmaha kobcinta xirfadaha dhinacyada laga ahmiyadda la siinayo. Waaaa in loo sameeya barnaamijyo oo la dhaqan galiyo iyada oo la eegayo ilmaha iyo qoyskuba dabeecadaha gaarka eey leeyihiin (ahmiyad siin, kala horeysiin, go'aan warqaba sameyn).

Waa maxay astaamaha gaarka ah ee u tilmaameysa bixiyeyaasha wax ka-qabashada hore in ilmuhu laga yaabe leeyahay autism/PDD?

Wakhtiga u dhexeeya ka welwelka ugu horeeya ee ka qabsada waalidka kobcidda ilmaha iyo marka si dhab ah looga helo autism/ASD waxay noqon kartaa ilaa labo sano. Waalid badan ayaa sheega iney kala kulmaan soo maritaan wareer badan dhakhtarada carruurta iyo kuwa kale xirfadaha gaarka ah u leh ee marka ugu horeysa ay kala kulmaan arrimaha ku saabsan kobcidda ilmahooda. Maadaama socod- baradku ay u koraan heerar kala duwan dhakhtarada carruurta waxay waano ugu bixiyaan waalidka waa "eeg oo sug" Hase yeeshee, arrintaasi badiyaa waxay ku danbeysaa in lagu lumiyo wakhti wax ka qabasho oo qiime badan lahaa, oo

waxay ku danebeysaa in u waalidku ka xumaadaan arrintaas. Markaa, waa muhiim in la dhageysto waalidka marka ay sharaxayaan waxyaabaha ilmahoodu ku fiican yihiin iyo waxay ku xun yihiin oo, haddey habboon tahay, in loo geeyo meel si loo qiimeeyo oo marraa loo siiyo adeegyada ku habboon. Liiska waxyaabaha lagu garto oo ay ka mid yihiin “Checklist for Autism in Toddlers (CHAT)” ayaa la buuxin karaa, si akhbaarta xanuunka qoysasku u wadaagaan, iyo/ama qoysaska loo siiyo macluumaadka ay ku wada xidhiidhi lahaayeen kooxaha waalidka iyo ururada ku lug leh carruurta leh autismka. Carruurta leh talax-yaraanta, cilmi baadhistu waxay cadeyneysaa ku nuuxnuuxsi horey wax –uga-qabasho ahi waxa u dhaliyaa natiijo wax ku soo baxa wakhti dheer oo hormar leh.

Xirfadleyaal badan ayaa ka fakara ka bad-badinta dabciyada ay ka midka yihiin, wareegeysiga, ku dhufashada, luxluxa, madax ku garaaca, iwm marka ay maqalaan ereyga autism. Runtii, calamadahani waa kuwa ku-xeegen ah. Waxa ugu weyn ee ku adag carruurta leh autismka waa garashada iyo isticmaalka kaayeysiga is-dhex-galaka. Taasi ma’aha carruurta autismka lehi ineyna kal-gacaltooyo lahayn, ayna dadka kale la xidhiidhi karin, ama ay dib uga hadhsan yihiin kobcitaanka xirfadaha bulshada. Carruurta leh autismka/PDD ayaa leh tayo ahaan dhibaato ka haysta wadaagga luqadda, wadaagga ciyaarta, iyo sidii loola xidhiidhi lahaa dadka kale.

Waalidku had iyo jeer waxay war ku bixiyaan in wixii ay ka walaacsanaayeen la sika dhaafey sababta oo ilmahooda oo lagu arkey hal astaan dabeeco oo fidiyuhu is yidhii lahaanshaha autism/PDD wey ka fogtahay. Xanuun ka helka go’aan lagu gaadhey ka helid ama ka helid la’aan hal dabeeco oo qudha ma aha. Waxa lagu helaa dabeecado isku guuteysan oo dhinaca xidhiidhitaanka ah, bulsho dhex-galka, iyo xiiso/fiir u lahaanta. Badiyaa waxa u dhexeeya helitaanka autismka iyo PDD waxay u bahaan tahay qof khibrad dheeraad u lah ASD.

Fidiyeyaasha waa in la ogeysiiyaa dhowr dabuubyo oo ah taariikhda kobcitaanka carruurta leh autism/PDD. Astaamaha hoos ku qoran ayey had iyo jeer waaliddada carruurta laga helay xanuunkan.

Ilmuhu waxa u leeyahay:

- Kobcitaan dhinaca luqadda ah oo isk caadi ah oo wakhtiga qaarkii, hadal laga waayo ama ayna waxba ku kordhin intii hore waxa dhaxeysa 24 ilaa 36 bilood.
- Fiirsasho sibiig ku tageysa marka la eego waxqabyada ugu badan, laakiin ay ka qaadaneyso wakhti dheer oo lagu xoogga la saaro waxaqabdku isagu/iyadu ay jecshahay/ u jecelyahay
- Xirfadda xubno dhaqdhaqaaqa, xasuusta, kelmad la’aanta dhibaataada lagu xaliyo oo ku kocaya si caadi ah ama marka loo eego luqadda iyo dad dhex-galka si aad ay tahay.
- U badasho kali ciyaaritaan ah ama la ciyaarka carruurta kale laakiin aan ahayn mid ciyaar fadhiisi wadag ama kaayeysi ah.
- Siyaabo ku soo jiiditaan ah waalidka sheyo (ilmuhu) jecleysto intii farta lagu fiiqi lahaa, hadal lagu sheegi lahaa, ama eegitaan indhaha ah oo isla socta.
- Dhibaato ka haysata ku dayasho wax-sameyn.
- Qosol ama oohin isdab-joog ah oo aan sabab lahayn.
- Hadal jabaq-celis ah (su’aalaha oo looga jawaabo dib ugu celin hadalkii uun).

- Awood u lahaanshaha maraka qaarkood in la moodo dagoole ahaan la yahay, laakiinse laga maqlo codmeelfog marka ay waxaasi yihiin wax la jecelyahay, (baabuurka ays-kriimka, Heesaha ku soo galka Tvga, iidheda).
- Jecleysiga ka doorbidka ah ee waxa soo noq-noqda(waxyaabaha carruurta ku ciyaartoo si sarb ah loo dhigo, ka madhka, daawashada Hagaha Buroofada anma jaanaka saadasha hawada).

Waa maxay daaweynta autism/PDD?

Cilmi baadhista ayaa 30kii sano ee la soo dhafey ayaa sheegaya daaweynta ugu guusha badani ka timaad ee carruurta leh autism/PDD iney tahay barnaamij waxbarashoo oo nidaameysan, oo aad ugu nuxnuuxsina ku leh luqadda and iyo dad dhex-galka. Terabiyo kale oo dadka la soo hor dhiagey ayaa ajira, hase yeeshe, inta ugu badan ee cilmi baadhistu waxay sheegeysaa in ku nuuxnuuxsiga waxbarshadu ay ta ugu waxtar badan tahay Si isku wada mid oo loogu hagaago ma laha carruurta ASD leh oo idili. Ilmo kastaa waxa uu u baahan yahay ku hagaag dhamaystiran, iskuna-dubaridan, oo meel loogu soo hagaago oo isku keenya daryeel fidiyeyaasha,iyo da'dooda sidooda oo kale u soo kobceysa

Maxaan sameeyaa haddii aan ka shikiyo in u jiro autism?

Arrinta wax kahelitaanka ilmaha oo aad u weyn awgeed ayaa ka cabsiisa fidiyeyaasha iney u sheegaan waalidka waxy u maleynayaan iney dhic karto iney arrintaasi tahay> Waa muhiim inaad la siiyo waalidka waxa laga qabo ee daacadda ah, oo ah in lagu waaniyo iney ka fikiraan in la qiimeeyo haddii aad is tidhaa wey ku habboon tahay. Waxa dhici karta inaad khald noqoto, laakiin haddii aad sax noqoto wakhti aad u qiime leh oo lumayaa ma jiraan Tallaabada ugu horeysaa waa qiimeyn dhameystiran oo ay sameeyaan dad khibarad u leh autismka. Waxa jira dhowr kheyraad ah oo ku hagaya. Qiimeynta, caawinta telfoonka, iyo ku hagidda kheyraadka deegaanka (kooxyada taageeridda qoyska, qiimeeyeyaasha iwm.) iyo waliba adeegyada qoysaska ee carruurta ayaa laga helaa gobalka oo idil. La xidhiidh ka agagaarkaaga ku yaal ee Isu-duwaha Horey wax Uga-qabashada Ubadku Masugi Karaan inaad hesho waxyaabo ku saabsan arrinta ee agagaarkaaga.

Maxaan ku idhaa waalidka ilmahoodu aan ka shakiyo in uu leeyahay autism/PDD?

Guud ahaan, macluumaadka (dad la siiyo) eene khibrad ahaan sax ahayni waxa ka badan xumaanta u dhalinayo intii u dhali lahaa wanaagga. Markaa haddaba waxaan kuu sheegeynaa inaad u sheegto waxaa aad si tidhi wey yihiin in qoyskaasi baadhaan iney laga yaabe noqoto nidaamka kobcidda ilmaha. Sii qoyska Xaashida Xaqiiqada ee Ubadku Masugi Karaan Xanuunka Autism Isbektiram (Autism Spectrum Disorders ama ASD)Su'aalaha Badiya ay Weydiyaan Fidiyeyaashu. Waalidku waxa kale oo ay la xidhiidhi karaan Ururka Autismka Ameerika ama Autism Society of America (ASA) halkan 800-328-8476 ama booqo websitka www.autism-society.org/. ASA waxa kale ooy leedahay dokuumeentiyo/birooshuuro fax lagu helo oo loogu talagaley waalidka lacag la'aan.